

Marka ay baadhayso DCF warbixinta tacadiga ama daycaada ilmaha, waa inaanu go'aamino hadii qof macquul ahi uu aaminsan yahay in ay dhacday. Haddii jawaabtu HAA tahay, warbixinta caddayn ayaa loo raadiyaa oo magaca qofka ayaa lagu darayaa Duwaanka Ilaalinta Ilmaha.

### Maxaa ku jira duwaanka duwaan gelinta?

1. Magaca qofka
2. Ugu yaraan hal shay oo kale oo sheegaya haybtiisa (sida, taariikhda dhalashada)
3. Taariikhda iyo nooca natiijada
4. Heerka ilaalinta ilmaha ee la xidhiidha khatarta mustaqbalka ee waxyeelada caruurta - ee dhamaan duwaanada lagu daray Julaay 1, 2009 ama wixii ka danbeeyay

### Dadwaynuhu ma geli karaan duwaanka?

Maya. Laakiin shaqaalaha wakhtigan ama shaqaalaha mustaqbalka ayaa geli kara hadii:

- ▶ Qofka la eegayo uu siiyo ogolaanshaha IYO
- ▶ Shaqadu ay ku taxaluuqdo caruurta, dhalinyarta ama dadka waawayn ee nugul

### Sidee ayay noqonaysaa hadii la igu caddeeyo?

Magacaaga waxaa lagu dari doonaa duwaanka - iyada oo aad ka doodo moojee caddaynta oo markaa la buriyo moojee.

### Sidee ayuu duwaanku ii saamayn karaa?

Waxa uu saamayn karaa awoodaada inaad:

- ▶ Dalbato korsasho ilme
- ▶ Noqoto bixiye daryeelka ilmaha ah
- ▶ Bixiso daryeelka korinta/ka nasinta
- ▶ Ka shaqayso ama aad wakhtiga ugu deeqdo shaqooyinka caruurta, dhalinyarta ama dadka waawayn ee nugul

Dad kale ayaa codsan kara duwaankaaga hadii ay khusayso. Waxa kamid ah tan:

- ▶ Hay'adaha ilaalinta dadka waawayn/ilmaha
- ▶ Gudida Shaqada Caafimaadka
- ▶ Xeer ilaaliyaha Gobolka

### QIIMAYNTA CADDAYNTA

Haddii lagugu caddeeyay:

- ▶ Laga bilaabo Janaayo 1, 1992 ilaa Agoosto 31, 2007:

Waxa aad dalban kartaa qiimayn aad kaga doodayso - wakhti kasta.

- ▶ Sebteembar 1, 2007/wixii ka danbeeyay:

Waxa aad dalban kartaa dib-u-eegid aad kaga doodayso - 14 maalmood gudahood marka boosta laguugu soo diro warqada laguugu sheegayo:

- ⇒ In aanu doonayno in aanu magacaaga ku darno duwaanka
- ⇒ Waxa aad xaq u leedahay inaad dalbato in dib loo eego caddaynta

### Sidee ayay wax noqonayaan hadii aan dalbado?

1. Waanu kula soo xidhiidhi doonaa si aanu kuugu qabano balan qiimeeyaha madaxa banaan.
2. Marka la qabto balanta, waxa aanu kuusoo diri doonaa warqada xaqiijinta iyo nuqulada waraaqaha baadhitaanka (*sida uu dhigayo sharcigu*).
3. Kulanka kadib, qiimeeyaha ayaa:
  - ⇒ Ayidi kara caddaynta
  - ⇒ Badali kara
  - ⇒ U sheegi kara DCF inay dib u furto baadhitaanka
4. Waxaa lagu soo diri doonaa warqada go'aanka.
5. Haddii qiimeeyaha uu ayido caddaynta:
  - ⇒ Waxaanu ku dari doonaa magacaaga duwaanka (*ama hadii hore uu ugu jiray waanu ku dayn doonaa*)
  - ⇒ Waxa aad go'aanka ka qaadan kartaa rafcaan aad u gudbinayso Gudida Adeegyada Bilaa Aadanka

### Haddii aanad dalban dib-u-eegid wakhtiga ay furan tahay:

- ▶ Magacaaga waxaa lagu dari doonaa duwaanka (*ama waxa uu ku jiri doonaa halkaas hadduu ku sii jiray*)
- ▶ Go'aanku waxa uu noqon doonaa kama danbays oo wixii intaa ka danbeeya ma lihid xuquuq aad ku dalbato *dib-u-eegid caddaynta ah*

## DIB-U-EEGIDDA KA SAARIDDA

Waxa aad dalban kartaa dib-u-eegid in magacaaga laga saaro (*masaxo*) duwaanka marka la gaadho tirado sanado ah oo cayiman. Mudada aad sugaysaa waxay ku xidhan tahay:

- ▶ Wakhtiga lagugu caddeeyey
- ▶ Heerka ilaalinta ilmahaaga (*hadii ay jirto*)

Akhri bogga 1 ee [foomka lifaaqa](#) si aad wax uga ogaato goorta aad dalban karto dib-u-eegidda ka saaridda. MA dalban kartid inta ay waajib tahay inaad ku jirto duwaanka danbiilaha galmada.

## Sidee ayay wax noqonayaan hadii aan dalbado?

1. Waxaa lagu siin doonaa fursad inaad u gayso macluumaadka qiimeeye. Waxa uu eegi doonaa xaaladaha sida:
  - ⇒ Nooca iyo tirada caddaymaha
  - ⇒ Mudada kasoo wareegtey
  - ⇒ Hadii ay u badan tahay inay dib u dhici doonto
  - ⇒ Waxyaabaha aad samaysay si aad taas u badasho
  - ⇒ Tixraaca dabeecadaada
2. Waxaa lagu ogaysiin doonaa go'aanka, kaas oo uu soo saarayo Gudoomiyaha DCF.
3. Hadii dalabkaaga la diido, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan aad u gudbiyo Gudida Adeegyada Bilaa Aadanka.

## DALABKA DIB-U-EEGIDA

1. Akhri bogga 1 ee [foomka lifaaqa](#) si aad wax uga ogaato hadii aad dalban karto wakhtigan.
2. Hadii aad awoodo, buuxi bogga 2 ee [foomka lifaaqa](#).
3. Uga jawaab su'aalaha si buuxda oo sax ah.  
*Kama hawlgali karno dalabkaaga isaga oo dhamaystiran moojee.*
4. Sheeg nooca dib u eegida aad dalbanayso.
5. Boosta ugu dir:

Department for Children and Families  
Commissioner's Registry Review Unit  
HC 1 North, 280 State Drive  
Waterbury, VT 05671-1080

**Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay kaalmo, la hadal (802) 241-2321.**

**Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad hesho:**

- ▶ Adeegyada turjubaada oo bilaash ah hadii Ingiriisigu kugu adag tahay
- ▶ Qaabilaad macquul ah hadii aad naafo tahay



# Duwaanka Vermont ee Ilaalinta Ilmaha



HAY'ADA ADEEGYADA BILAA AADANKA  
WAAXDA CARUURTA IYO QOYSASKA